



AMARKA FULLINTA LAMBARKA. 20-05

**KA MAMNUUCIDA KULAMADA BALAARAN SABAB LA XIRIIRTO
DILAACA FAYRASKA CORONA (COVID-19) EE OREGON**

Xiliga Maarso 8, 2020, waxaan ku dhawaaqay waxaan ku dhawaaqay xaalad degdeg ah sida waafaqsan ORS 401.165 *et seq.* sabab la xiriirto halista caafimaadka bulshada ee keenay caabuqa cudurka fayraska corona (COVID-19).

Xiliga Maarso 10, 2020, sida ku saleysan tallooyinka ka imaanayo Maamulka Caafimaadka Oregon, Waaxda Adeegyada Aadanaha waxay soo rogeen tallaabo xadeyno iyo illaalo lagu yareynayo martida ee xarumaha daryeelka muddada dheer oo kaliya shaqaalaha muhiimka ah. Maamulka Caafimaadka Oregon waxay qaadayaan tallaabooyin la mid ah ee Isbitaalka Gobolka Oregon iyo goobaha kale ee caafimaadka dabeecada.

Xiliga Maarso 11, 2020, Hay'ada Caafimaadka Aduunka waxay ku dhawaaqeen in COVID-19 uu yahay cudur ku faafo caalamka.

Ka bilow maanta, waxaa jiro 21 dacwado ama la xaqiijiyo oo fayraska corona oo laga saadaaliyay Oregon, iyo saraakiisha caafimaadka bulshada deegaanka iyo gobolka waxay ku taliyeen in fayraska ku sii faafayo bulshada oo ay filanayaan tirada dacwadaha inay kordhaan.

COVID-19 wuxuu ku faafaa qof-ku-qof oo dhinaca qufaca iyo hindhista, taabashada shaqsiga dhow, sida taabashada ama gacmo salaamida, ama taabashada shey ama sagxad leh fayraska, iyo kadib taabashada afkaaga, sanakaaga, ama indhaha. Aastaamaha waa qandho, qufac iyo adkaanshaha neefsashada.

Waafaqsan xeeladaha yareynta oo bulshada ay ugu taliyeen Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurka (CDC) oo la xiriirto COVID-19, si markaas loo yareeyo faafida cudurka, oo looga illaaliyo dadka reer Oregon oo ku jiro halisaha sareeyo oo gaarista cudurka, waxaan ogaaday in fullin markaas ah oo ka fogaanshaha bulshada iyo tallaabooyinka yareynta bulshada waa muhiim.

**HADEET SIDAAS DARTEED, WAXAA HALKAAN LAGU JAHEEYAY
OO LAGU AMRAY IN:**

1. Sida waafaqsan ORS 433.441(3)(a) iyo (d), ORS 401.175(1), iyo ORS 401.188(2), waxaan mamnuucayaa bulshada balaaran, ruuxiga, iyo kulamada madadaalada oo 250 qof ama ka badan, gobolka oo dhan.



2. Kulamada quseeyo Sadarka 1 ee Amarkaan fullinta waxaa ku jiro, laakin kama xadidno, bulshada, rayidka, dadweynaha, firaaqada, diinta ku saleysan, iyo dhacdooyinka ciyaaraha, riwaayadaha, shirarka, lacago aruuriyayaasha, iyo dhacdooyinka ama howlaha la midka ah, haddii baaxada ugu yaraan sadex (3) fiit u dhaxeeyo shaqsiyaadka lama joogteyn karo.

**AMARKA FULLINTA LAMBARKA. 20-05
BOGGA LABO**

3. Sadarka 1 ee Amarkaan Fullinta ma quseeyo ka qeybgalka dugsiga, meelaha shaqada, dukaamada adeega, ama dukaamada tafaaqiida.
4. Waxaan u xilsaarayaa ogolaanshaha Maamulka Caafimaadka Oregon iyo Agaasimaha Caafimaadka Bulshada inay bixiyaan jaheynta la xiriirto noocyada iyo qeybaha kulamada quseeyo Amarkaan Fullinta.
5. Ka bilow Maarso 16, 2020, qof walba ee lagu helo inuu ku xadgudbayo amarkaan waxaa quseeyo ciqaabaha lagu sharaxay ORS 401.990.

Amarkaan Fullinta wuxuu bilaabanayaa islamarkaas oo sii soconayaa illaa Abriil 8, 2020, illaa uu ku kordhiyo ama joojiyo xili hore Gofanatooraha.

Waxaa lagu sameeyay Portland, Oregon maalintaan 12^{aad} ee Maarso, 2020.

Kate Brown
GOFANATOORAHA

CADEYNTA:

Bev Clarno
XOGHAYAH GOBOLKA